Asylum Support Partnership
help and advice

March 2010 Somali

# Codsiga taageero lacag (kaash)kaliya : la degista qof qoyska ah ama saaxiib

Haddii aad imminka taageero ah hoy iyo lacag (kaash) ka heshid Hay'adda Xuduudka iyo Imigarayshanka (UK Border Agency - UKBA) oo aad rabtid inaad ka baxdid hoyga oo la noolaatid qof qoyska ah ama saaxiib, waa inaad u sheegtid UKBA ka hor inta aanad guurin. Haddii aad ku jirtid hoy bilaw ah oo ay bixisay UKBA waa inaad sidoo kale u sheegtid bixiyaha hoyga. Haddii aanad sidaa yeelin waxa dhici karta in UKBA ay joojiso taageerada lacagta (kaashka) ah ee ay ku siiso.

Qoraalkan yari waxa uu sheegayaa:

- Sida guuristu u saameyn karto taageerada dhaqaale ee aad ka heshid UKBA
- Waxa la rabo inaad ka fiirsatid ka hor inta aanad guurin
- Sida oggalaansho loo weydiisto UKBA si aad ula noolaatid qof qoyska ah ama saaxiib
- Waxa ay yihiin dukumentiyada la rabo si aad u taageertid codsigaaga iyo
- Sida aanu kuu gargaari karno

## Haddii aan la dego saaxiib ama qof qoyska ah taasi ma saameyn doontaa taageerada kaashka (lacagta) ah ee aan ka helo UKBA?

Fadlan la soco inaan UKBA aanay wax lacag ah ku bixin doonin hoyga ama biilashada guriga ee qofka qoyskaaga ah ama saaxiibkaa. Sidaa daraadeed waxa muhiim ah inaan saaxiibkaa ama qofka qoyska ahi kaa filaynin inaad bixisid kiro ama lacag ku dartid bixinta kharashyadooda ama biilashadooda.

## Ma la degi karaa saaxiibkay ama qof qoyska ah haddii ay ku nool yihiin gobol kale oo ka tirsan Boqortooyada (UK)?

Haa, waxa aad weydiisan kartaa inaad la degtid saaxiib ama qof qoyska ah oo ku nool aag kale. Hase yeeshee, haddii aad rabtid inaad la noolaatid qof degan magaalo kale ama gobol kale oo ka tirsan Boqortooyada (UK), waxa loo baahan doonaa in faylkaaga imigarayshanka la wareejiyo waxana aad u baahan doontaa inaad iska xaadirisid gobol kale.

**Haddii aad ku nooshahay gobol ka tirsan Boqortooyada (UK) oo kaa raba inaad oggalaansho ka heshid UKBA si aad u guurtid, waa in aanad guurin ka hor inta aanad helin oggalaansho qoran. Guurista aan oggalaansho lahayn waxay saameyn kartaa sheegashadaada magangalyo.**

**Haddii aanad hubin in lagaa rabo oggalaansho qoran oo ay UKBA u bixiso guurista iyo in kale, talo weydiiso hay'adda qaxootiga ee kuugu dhow.**

Qoraale kale oo tarjuman ayaa laga heli karaa http://languages.refugeecouncil.org.uk
Asylum Support Partnership is a partnership project hosted by the British Refugee Council
British Refugee Council, (commonly called the Refugee Council) is a company limited by guarantee registered in England and Wales, [No 2727514] and a registered charity, [No 1014576].
Registered office: 240-250 Ferndale Road, London SW9 8BB, United Kingdom, VAT no: 936 519 988

## Maxaa kale ee aan u baahanahay inaan ka fiirsado ka hor guurista?

- **Qaybta 55 (Section 55) (oo ah sharci UKBA awood u siinaya inay diidaan bixinta taageero kaash ah)**

Haddii aad magangalyo ku codsatay mudo ka badan saddex maalmood (72) saacadood ka dib markii aad timid Boqortooyada (UK) oo aad rabtid inaad codsatid kaliya taageero kaash ah, waxay u badan tahay in lagaa rabi doono inaad tagtid wareysi ah Qaybta 55 (Section 55) oo ay kula yeelanayso UKBA.

Marka wareysigaasi dhacayo, waxay UKBA ka fiirsan doontaa waxyaabahan soo socda:

- Inaad magangalyada ku weydiisatay sidii ugu dhakhsaha badnayd ee aad caqli-gal ahaan ku sameyn karaysay iyo in kale
- In ay rumeysteen sharaxaadda aad ka bixisay imaatinkaaga
- In darxumo bini'aadan-daro ah ama macaamil wax kuu dhimaya uu ku qabsan doono haddii UKBA ay kuu diido in taageero ay ku siiso.

Haddii UKBA ay go'aamiso in aanad sheegashadaada magangalyo ku sameynin gudaha wakhti caqli-gal ah ('sida ugu dhakhsaha badan ee caqli-gal ahaan suurtogal ahayd'), waxa dhici karta inay diidaan inay ku siiyaan wax ah taageero kaash ah. Go'aankaas kama qaadan kartid racfaan ama ambiil, hase yeeshe waxa aad weydiisan kartaa in dib looga fiirsado.

- **Helitaanka talo sharci**

Haddii aad u guurtid meel ama gobol kale oo ka tirsan Boqortooyada (UK), waxa dhici karta in wakiilkaaga sharci ee hadda uu kuu sheego in aanuu sii wadi karin inuu wakiil kaa ahaado.

Iskotlaan waxay leedahay nidaam sharci oo ka duwan inta kale ee Boqortooyada (UK). Haddii kiiskaagu uu hoos yaalo Dib-u-fiirin Xaakin (Judicial Review) ama uu ku jiro racfaan yaala Maxmamad Shireedka ee Iskotlaan (Court of Session in Scotland), waxa aanu si weyn kuugula talinaynaa inaad ikhtiyaaradaada kala hadashid wakiilkaaga sharci ka hor inta aanad weydiisan inaad u guurtid gobol kale oo ka tirsan Boqortooyada (UK).

- **Kharashka Safarka**

Haddii aad go'aan ku gaadhid inaad guurtid, UKBA kaama gargaari doonto kharashka safarka waana inaad adigu iska bixisid kharashka safarka.

## Maxaa la rabaa inaan sameeyo haddii la iga rabo inaan oggalaansho ka helo UKBA ka hor guurista?

Waa inaad codsi qoran oo aad saxeexday u gudbisid UKBA. Sidoo kale waa inaad keentid cadeyn qoran oo ka timid saaxiibkaa ama qofka qoyskaaga ka tirsan oo ay ku cadeynayaan inay kuu oggalaan doonaan inaad la noolaatid.

Haddii saaxiibkaa ama qofka qoyskaaga ka tirsan uu leeyahay hoyga uu degan yahay waa inay keenaan warqad sheegaysa:

- Inay leeyihiin hoyga oo ay raali ka yihiin inay kuu oggalaadaan inaad la noolaatid
- In aanay filaynin inaad wax ka bisixid kirada ama biilasha gaasta, korontada iyo biyaha (adeegyada guriga) (oo loo yaqaano "utilities"), iyo
- Inay ku siin doonaan kaliya hoy ee aanay awoodin inay ku siiyaan wax ah taageero dhaqaale oo dheeraad ah.

Waxa kale oo laga rabaa inay bixiyaan:

- Biil ah adeegyada guriga (utility) oo cusub (sida gaas, koronto, biyo) oo muujinaya magacooda iyo adreeskooda; iyo
- Cadeyn inay leeyihiin guriga, tusaale ahaan warqadda bixinta daynta guriga (mortgage).

Haddii saaxiibkaa ama qofka qoyskaaga ka tirsan uu kireystay guriga, waa inay bixiyaan:

- Warqad saxeexan oo ka timid mulkiilaha guriga oo adiga oggalaansho kuu siinaysa inaad kula noolaatid saaxiibkaa gudaha hoyga la sheegay
- Warqad saxeexan oo ka timid saaxiibkaa oo xaqiijineysa inay hoy ku siin karaan oo aanay kaa filaynin inaad wax ka bixisid kirada guriga ama biilasha adeegyada guriga (utility) (gaas, koronto, biyo) iyo
- Biil ah adeeg guri (utility) oo dhawaan ah oo uu ku qoran yahay magacooda iyo adreeskooda.

**Sidee baanu kuu gargaari karnaa?**

Hay'adaha qaxootigu waxay kaa gargaari karaan inaad codsi qoran u gudbisid UKBA adiga oo weydiisanaya oggalaansho inaad la degtid qof qoyska ka tirsan ama saaxiib. Bixiyaha hoygaaga UKBA ee hadda ayaa awoodi kara inuu kuu sheego meesha ay ku taalo hay'adda qaxootiga ee degmadaada, ama waxa aad isticmaali karta barta internetka ama webka ee ku taala xagga hoose ee bogga soo socda.

Haddii aad u baahan tahay inaad inaad UKBA u sheegtid faahfaahinta meesha cusub ee lagaala soo xidhiidhi karo, waxa aad la xidhiidhi kartaa hay'adda qaxootiga ee kuugu dhow.

**Maxaa dhacaya marka ku xigta?**

Haddii aad codsatid oggalaansho inaad la degtid qof qoyska ka tirsan ama saaxiib waxay qaadan doontaa dhawr todobaad in UKBA ay ka shaqeyso codsigaaga. UKBA toos ayay warqad kuugu soo qori doontaa ay kugu wargalinayaan go'aankooda.

Haddii aanad wax war ah ka helin UKBA ka dib afar todobaad, fadlan la hadal mid ka mid ah hay'adaha qaxootiga.

Haddii codsigaaga in aad guurtid la aqbalo, UKBA toos ayay warqad kuugu soo qori doonaan waxana ay ku weydiin doonaan inaad u sheegtid taariikhda saxda ah ee aad ku talojirtid inaad guurtid. Ka dib waxay waraaqaha u soo diri doonaan adreeska cusub.

Haddii aad guurtid ka dibna dhibaatooyin kaa qabsadaan taageeradaada, waa inaad la xidhiidh hay'adda qaxootiga ee u dhow adreeskaaga cusub, maaha inaad xidhiidhid hay'addii qaxootiga ee ku taalay aaggaagii hore.

Asylum Support Partnership consists of:

North of England Refugee Service, charity number: 1091200 www.refugee.org.uk
Refugee Action, charity number: 283660 www.refugee-action.org.uk
Refugee Council, charity number: 1014576 www.refugeecouncil.org.uk
Scottish Refugee Council, charity number: SC008639 www.scottishrefugeecouncil.org.uk
Welsh Refugee Council, charity number: 1102449 www.welshrefugeecouncil.org